



P.O. Box 14015, Salem, OR 97309
Voice: 1-800-699-9075
FAX: 503-378-5628
TTY: 711
www.ohp.oregon.gov

September 2022

Case number:

Ka dhig macluumaadka lagaala soo xiriirayo mid cusub si lagaaga caawiyo in aad sii haysato faa'iidooyinkaaga

Xubinta Qorshaha Caafimaadka Oregon ee Qaaliga ah,

Caymiska Qorshahaaga Caafimaadka Oregon (OHP) isma beddelayo! Warqadani waxay ku saabsan tahay tallaabooyinka ay tahay in aad qaado si aad gacan uga geysato sii haysashada caymiskaaga mustaqbalka.

Sida macluumaadka lagaala soo xiriirayo looga dhigo mid cusub:

- 1. Isla markiiba nala soo socodsii marka aad cinwaankaaga boosta, cinwaankaaga email-ka ama lambarkaaga telefoonku isbeddelo.** Fiiri bogga 2 siyaabo lagu soo sheego isbeddelada.
- 2. Fiiri boostadaada oo akhri ogeysiinta aanu dirno.** Had iyo jeer noo soo dir macluumaadka aanu codsano.
- 3. Ka dhig kuwo cusub oo leh akhbaartii u dambeeyay ee OHP.** Booqo **OHP.Oregon.gov** ama weydii ururka hawl wadaagaha bulshada OHP ee degaankaaga. Mid ka hel bit.ly/ohplocalhelp.

Waxa ay tahay in aad ogaato:

1. Caymiskaaga OHP waa mid weli shaqeynaya.

Uma baahnid in aad ka soo jawaabto warqadani. Haddii aanu u baahanahay macluumaad dheeraad ah, waan kula soo socodsiin doonaa — ilaa iyo inta aanu haysano macluumaadka lagaala soo xiriirayo oo cusub.

2. Isbedelada soo socda ee OHP ka dib xaalada degdega ah ee COVID-19:

Intii lagu jiray cudurka baahsan ee COVID-19, inta badan xubnuhu waxay sii haysteen OHP, xataa haddii yeesheen isbeddel ku dhacay noloshooda, sida sameynta lacag dheeraad ah. Tani waxay ahayd sababta oo ah isbeddelada siyaada hoos timaada Xaaladii degdega ah ee COVID-19.

3. Ka dib dhammaadka xaalada degdega ah ee COVID-19:

Waanu kula soo xiriiri doonaa haddii aanu u baahanahay macluumaad dheeraad ah si loo ogaado in aad u qalanto OHP.

Waxaanu rabnaa in aanu kaa caawino in aad diyaar tahay marka ay taasi dhacdo. Haddii aynaan kula soo xiriiri karin, waxaad lumin kartaa caymiskaaga. Ka dhigista macluumaadka lagaala soo xiriirayo mid cusub waxay gacan ka geysan kartaa in aad ku sii sugnaato in aad caymis lahaato.

Sida loo soo sheego isbeddelada

Waxaad isbeddelada u soo sheegi kartaa hababka soo socda:

La xiriir Daryeelkaaga Urruradu Iska kaashadeen (CCO)

Kani waa ururka gacanta ku haya OHP aad leedahay.

- Waxaad CCO-gaaga garan kartaa adiga oo hubinaya kaarkaaga Aqoonsiga xubinimo.
- Macluumaadka lagaala soo xiriirayo CCO-gaaga ka hel: bit.ly/ccoplans.

Dhanka Internet-ka

benefits.oregon.gov

Sameyso koonto ama gal koontadaada hadda jirta.

Waxaa la helayaa iyaga oo ku qoran Ingiriisi ama Isbaanish.

Telefoon ahaan:

Customer Service Center

- 1-800-699-9075 (TTY 711)
- Isniinta ilaa Jicmaha, 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Waqtiga Baasifiga.
- Turjubaano ayaa la helayaa.
- Waxaad sidoo kale turjubaan ku heli kartaa luqadda aad doorbidayso ka hor inta aadan la hadlin shaqaale. Khadka luqadda ka hel benefits.oregon.gov.

Shakhsi ahaan ama telefoon ahaan:

Dadka Waayeelka iyo Naafada ah, Barnaamijyada Isku-Filnaanshaha ama xafiisyada Hay'ada Dadka Waayeelka ah

- Goobaha iyo lambarrada telefoonka ka hel Oregon.gov/DHS/Offices.
- Fadlan soo wac ka hor intaadan aadin xafiiska.
- Turjubaano ayaa la helayaa.

Waad mahadsan tahay,

Qorshaha Caafimaadka Oregon

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Wac 800-699-9075 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.